Jamhuuriyadda Federaalka Ee Soomaaliya
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
Xafiiska Agaasimaha Guud

جمهورية الصومال الفيدرالية
إدارة الهجرة والجنسية
مكتب المدير العام

Immigration and Naturalization Directorate
Director General Office

Ref: HSJ/XAG/0221/23 Tr: 07/11/2023

**Ku: Xafiisyada Laga Bixiyo Baasaboorka**
**Ku: Laamaha HSJ u Qaabilsan Gobolada**
Og: Waaxda Jinsiyadda HSJ
Og: Waaxda Baarista HSJ
Og: Waaxda Howlaha HSJ
Og: Waaxda Kormeerka HSJ
Og: Lataliyaha Sharciga ee HSJ
Og: Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Soomaaliya ku Leedahay Caalamka
Og: Wasaaradda Arimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga
Og: Wasiirka Amniga Gudaha

**Ujeeddo: Hab-raaca Bixinta Baasaboorka Soomaaliga**

Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, isagoo garoowsan in dib u eegis lagu sameeyo Hab-raaca Bixinta Baasaboorka si waafaqsan sharci No 21, 07 April 1970 ee baasaboorka, sharci No 12 sharciga dhismaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, iyo Sharci No 06 Sharciga Socdaalka oo labaduba soo baxay 20 March 2023 iyo sharciyadda dalka, isla markaana tixgelinaya xuquuqda aas-aasiga ah ee muwaadinku inuu helo hagayaal tilmaan cad ka siinaya adeegyadda kala duwan ee ay bixiso HSJ. Wuxuu soo saaray hab-raaca bixinta baasaboorka Soomaaliga, kaas oo qeexaya hanaanka loo marayo maareynta xaalad kasta oo la xariirta bixinta baasaboorka.

Hadaba, xafiisyada uu khuseeyo hab-raacaan waxaa la farayaa in ay si dhammeystiran u dhaqan geliyaan si loo dhowro sumcadda baasaboorka iyo guud ahaan dukumentiyada safarka.

Mahadsanidiin.

**Mdne. Axmed Siciid Maxamed**
**Agaasimaha Guud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
Immigration and Naturalization Directorate
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**TUSMO**

1. Qaadashada Baasaboorka Caadiga ..................................................................................2
2. Cusbooneysiinta Baasaboor Dhacay ama buuxsamay.......................................................................3
3. Dib u Bixinta Baasaboorka Lumay............................................................................................4
4. Wax ka Badalka Xogta ku Qoran Baasaboorka ..............................................................................4
5. Baasaboorada Diblomaasiga iyo Shaqada......................................................................................7
6. Qaab-qoridda Baasaboorka Soomaaliga ah ....................................................................................8
7. Hubinta Sharciyadda Ajaanibta Sheeganaya Jinsiyadda Soomaaliga ah.... ........................................8
8. Baarista iyo Go'aanka Gaarista.....................................................................................................9

### Fasiraada Erayadda

1. Dowlada/Dalka: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
2. Dastuur: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
3. HSJ: Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
4. Habraaca: Habraaca Bixinta Baasaboorka Soomaaliga
5. Liiska Madow: Back List
6. Cancellation : Burin/Buriyay
7. Baasaboor Diblomaasiga: Diplomat Passport
8. Baasaboorka Shaqada: Service Passport
9. Xafiisyadda Dibadda: Xafiisyadda Bixinta Baasaboor ee Qusuliyadaha iyo Safaaradaha
10. Habka: System-ka Baasaboorka Bixinta

### QODOBKA 1aad
### Qaadashada Baasaboorka Caadiga

Qof kasta oo Soomaali ah wuxuu xaq u leeyahey qaadashada baasaboorka caadiga ah haddii uu soo buuxiyo shuuradaha hoos ku xusan;

1. Codsiga shaqsiga oo qoraal ah;
2. 2 sawir oo teesare ah;
3. Warqadaha Dhalashada iyo Sugnaanta (Dowladda hoose ee deegaanka uu degan yahay ama Saafaaradaha/Qunsuliyadda Soomaaliya ay ku leedahey dalka uu joogo);
4. Warqadda Danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID) iyo dokumentiyada sugaya xogta muwaadinka ee ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda ;
5. Ka gudbo hubinta shaqsiga iyo warqadaha ku xusan qodobada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4ad;
6. Warqadda caddeynta bixinta lacagta baasaboorka.

## QODOBKA 2$^{aad}$:
## Cusbooneysiinta Basaboor Dhacay ama buuxsamay

Baasaboor dhacay waxaa looga jeedaa baasaboor gaaray mudadii uu dhacayey, ee ku xusan bogga xogta ee baasaboorka, balse sharcigu wuxuu muwaadinka u ogol yahay in uu codsan karo baasaboor cusub marka baasaboorkiisa ay ka dhiman tahey 6 bilood iyo wixii ka yar.

### A. Shuruudaha Laga Doonayo Muwaadinka badalaya baasaboorka ka dhacay ama buuxsamay

Qof kasta oo Soomaali ah wuxuu xaq u leeyahay in loo cusbooneysiiyo basaboorka ka dhacay haddii uu buuxiyo shuuradaha hoos ku xusan;

1. Codsiga shaqsiga oo qoraal ah;
2. 2 sawair oo teesare ah;
3. Baasaboorka ka dhacay ama buuxsamay;
4. Warqadaha dhalashada iyo sugnaanta (Dowladda Hoose ee deegaanka uu degan yahay ama Safaarada/Qunsuliyadda Soomaaliya ku leedahey dalka uu ku noolyahay);
5. Warqadda danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID); iyo dokumentiyada kale ee sugaya xogta muwaadinka oo ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda;
6. Ka gudbo hubinta shaqsiga iyo waxyaabaha ku qoran qodobada 1aad; 2aad, iyo 3aad, iyo 4aad (Xaafiiska hubinta iyo bixinta ogolaanshaha);
7. Caddeynta bixinta lacagta Baasaboorka haddii uu ka gudbo qodobada 1aad; 2aad, 3aad, iyo 4aad (Xafiiska maaliyadda).

**FG**: Baasaboorka dhiciddiisa ay ka dhiman tahay 6 bilood ka yar ama buuxsamay waa la cusbooneysiin karaa. Baasaboorka Soomaaliya ee dhacay laguma cusbooneysiin karo gacan, waa in dib loogu dalbaa muwaadinka.

### B. Talaabooyinka Laga Doonayo Sargaalka qabanaya shaqada Cusbooneysiinta Baasaboor dhacay ama buuxsamay;

Marka baasaboor loo sameynayo muwaadin mid hore u lahaa uuna ka dhacay ama ay dhawdahay waqtigii uu dhacayey, waxaa lagama maarmaan ah inuu keeno baasaboorka dhacay ama ku dhow, waxaana sargaalka u shaqeynaya laga doonayaa in uu qaado tilaabooyinkaan soo socda;

1. Waa in uu hubiyaa baasaboorka dhacay, dukumentiyada safarka dhicida ku dhow, ama buuxsamay (marka codsiga muwaadinka laga qabanaayo).
2. Waa in uu duleeliyaa ama geesaha ka jaraa baasaboorka dhacay ama buuxsamay (Marka muwaadinku qaadanayo baasaboorka cusub ee loo sameeyay) ;
3. Waa in uu ku wareejiyaa muwaadinka baasaboorkii hore isaga oo la duleeliyay ama geesaha laga jaray.
4. In la siiya baasaboor qof hore u lahaa mid kale, isaga oo aan sarkaalka qaadin tilaabooyinkaan si dhameys tiran, waxaa ka dhalanaysa dambi lagu muteysan karo ciqaab.

**QODOBKA 3aad:**
**Dib u Bixinta Baasaboorka Lumey**

Qof kasta oo Soomaali ah wuxuuu xaq u leeyahay in dib loogu sameeyo baasaboorka ka lumay, haddii uu buuxiyo shuuradaha hoos ku xusan;

1. Codsiga shaqsiga oo qoraal ah;
2. 2 sawair oo teesare ah;
3. Warqadda caddeynta lumidda baasaboorka ( Boliiska deegaanka uu ku lumay);
4. Inuu dhammeeysto muddada baafinta baasaboorka 1 bil ah (30 Cisho);
5. Warqadaha dhalashada iyo sugnaanta (Dowladda hoose ama safaaradda/Qunsuliyadda dalka uu ku nool yahay);
6. Warqadda danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID); iyo dokumentiyada kale ee sugaya xogta muwaadinka oo ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda;
7. Ka gudbo hubinta shaqsiga iyo waxyaabaha ku qoran qodobada 1aad; 2aad, 3aad, iyo 4aad (Xaafiiska hubinta iyo bixinta ogolaanshaha);
8. Caddeynta bixinta lacagta Baasaboorka haddii uu ka gudbo qodobada 1aad; 2aad, 3aad, iyo 4aad (Xafiiska maaliyadda).

**QODOBKA 4aad:**
**Wax ka Badalka Xogta ku Qoran Baasaboorka**

Muwaadinku wuxuu xaq u leeyahey in uu codsan karo in wixii ka qaldama baasaboorkiisa uu iska badali karo inta sharcigu xadeeyey oo kali ah, isaga oo maraya shuruudaha ku cad Hab-raacaan.

Wax-kabadalka Baasaboorka ma ahan wax iska furan, sida ku cad xeerarka bixinta Baasaboorka, waxaa wax laga badali karaa qodobada hoos ku xusan midkood;

**A. Wax Ka Badalka Fudud iyo Shuruudaha Laga Doonayo Muwaadinka Codsanaya**

1. Sixidda higgaada xarfaha;
2. Ka reebidda darajooyinka aan qormin sida (Xaaji, Shiikh, Ugaas, Macalim, iwm); hadii uusan burin ama waxkabedal ahayn.
3. Badalka Shaqada
4. Badalka Goobta dhalashadda

Hadaba, Qof kasta oo Soomaali ah oo xogtiisa ku qoran Baasaboorka wax ka qaldan yihiin ama go'aansadey inuu wax iska badalo wuxuu codsan karaa in baasaboorkiisa xogta ku qoran ee Qodobka 4aad wax laga badalo haddii uu buuxiyo shuruudahaan:

1. Codsiga Shaqsiga oo qoraal ah;
2. 2 sawir oo teesare ah;
3. Baasaboorka wax laga badalayo;
4. Warqadaha dhalashada iyo sugnaanta cusub (Dowladda hoose ama Safaarada/Qunsuliyadda Soomaaliya ku leedahey dalka uu ku noolyahay);

5. Warqadda danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID); iyo dokumentiyada kale ee sugaya xogta muwaadinka oo ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda;
6. Dokumiinti cadeynaya xogta uu qofku badalaayo oo laga tixraaco haddii ay jiraan sida, Shahaado rasmi ah, baasaboor hore, Ruqsadda wadista baabuurta (License), IWM;
7. Ka gudbo hubinta shaqsiga iyo waxyaabaha ku xusan qodobada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad iyo 6aad (Xafiiska Hubinta iyo Ogolaanshaha);
8. Caddeynta bixinta lacagta baasaboorka hadduu ka gudbo qodobada 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad iyo 6aad (Xafiiska Maaliyadda).
9. Warqadda maxkamadda oo caddeyneysa waxa laga badalayo baasaboorka (maxkamadda Deegaanka uu degan yahey, ama hore u deganaa inta uusan dalka ka bixin);

**FG**: Baasaboorka Soomaaliga ah hal mar ka badan wax lagama bedeli karo, sidoo kale burinta (Cancellation) wuxuu marayaa Guddiga marka habraaca Burinta/Waxkabedalka soo buuxiyo.

### B) Wax Ka Badalka Taariikhda Dhalashadda

Hadaba, Qof kasta oo Soomaali ah oo da'diisa ku qoran Baasaboorka wax ka qaldan yihiin wuxuu codsan karaa in baasaboorkiisa da'da ku qoran loo badalo haddii uu buuxiyo shuruudahaan:

1. Codsiga Shaqsiga oo qoraal ah;
2. 2 sawir oo teesare ah;
3. Soo celinta Baasaboorka wax laga badalayo;
4. Warqadaha dhalashada iyo sugnaanta cusub (Dowladda hoose ama Safaarada/Qunsuliyadda Soomaaliya ku leedahey dalka uu ku noolyahay);
5. Warqadda danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID); iyo dokumentiyada kale ee sugaya xogta muwaadinka oo ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda;
6. Dokumiinti cadeynaya taariikhda uu qofku dhashay oo la tixraaco sida, Shahaado rasmi ah IWM;
7. Ka gudbo hubinta shaqsiga iyo waxyaabaha ku xusan qodobada kore (Xafiiska Hubinta iyo Ogolaanshaha);
8. Caddeynta bixinta lacagta baasaboorka hadduu ka gudbo qodobada kore (Xafiiska Maaliyadda).
9. Warqadda Maxkamadda oo caddeyneysa taarikhda dhalashada saxda ah (Maxkamadda Deegaanka uu degan yahey, ama hore u deganaa inta uusan dalka ka bixin);

**FG**: Shaqsiga codsada in laga bedalo da'a ka badan 3-sano waxaa loo gudbinayaa Guddiga burinta/Waxkabedalka.

### C) Wax Ka Bedalida Magac Ama Kala Horumarinta Magacyadda (Burin)

Shaqsiga raba in uu xogtiisa magac ka belado sida; macagiisa 1aad, iyo 2aad mid ka mid ah ama magaca hooyadiis ee 1aad, iyo 2aad mid ka mid ah, wuxuu habka baasaboorka u yaqaanaa burin, qofkii uu kiiskiisu noqdo burin waxaa la marinayaa qodobada soo socda.
Waa inuu keenaa xafiiska Baasaboor Bixinta dokumiintiga kala ah;

1. Baasaboorka wax laga bedalayo (asalka);
2. Dhalasho iyo Sugnaan;

3. Warqadda danbi la'aanta qofka qaangaarka ah ee ku sugan dalka gudihiisa (CID); iyo dokumentiyada kale ee sugaya xogta muwaadinka oo ay bixiyaan safaaradda iyo Qunsuliyadaha dibadda;
4. Warqad Damaanad ah, oo uu damiintuhu ku cadeynayo in qofka uu damiinanayo ku yaqaano magaciisa saxda ah ee uu rabo in dib loogu celiyo;
5. Nuqul dokumiintiga rasmi ah ee qoyska sida; Aabe, Hooyo, Walaal, Adeer, Habaryar iyo Edo;
6. Haddii uu jiro Aqoonsi kale oo uu leeyahay qofka xogta bedalaya kuna qoran yahay magaca saxda ah ee uu rabo in dib loogu qoro baasaboorkiisa sida; Shahaado rasmi ah, baasaboor hore, Ruqsadda wadista baabuurta (License), Aqoonsi shaqaale-nimo oo rasmi ah, Ruqsad dhul ama ganacsi IWM.
7. Xafiiska Baasaboor Bixinta ee HSJ marka la keeno dokumentigii oo dhamaystiran iyo xiriirka qofka ayaa waxaa loo soo gudbinayaa Xafiiska Caawiye wixii ah Laan, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha la keeno oo usoo gudbin doona xafiiska Kaalinka, halka kiisaska Xamarna toos ugu qabanaayo Xafiiska Kaalinka Agaasinka Guud;
8. Howlwadeenadda qaabilsan kiisaska burinta ayaa la xiriiraya qofka iyaga oo u sameyn doona balan waqtiga la wareysan doono, kuna balaminaya Xafiiska uu ku shaqeeyo Guddiga.
9. Maalinta balanta waxaaa qofka si wada jir ah u wareysan doona Guddiga HSJ iyada oo qofka wax bedalaya uu hor fadhiyo, sidoo kale qofka kiiskiisa ay soo gudbiyaan Laamaha iyo Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha waxaa lagu wareysanayaa alaadada fogaan arag sida; Skype, Zoom iyo What's App isaga oo ku sugan xafiiskii hore u soo gudbiyay kiiskiisa;
10. Wareysiga iyo baaritaanka Guddiga HSJ way u madax banaanyihiin iyaga oo weydiinaya qofka sua'aal walba oo ay u arkaan in uu qofku ka mudan yahay si ay uga soo saaraan wixii been abuur ah oo jira.
11. Waxaa la sameynayaa baafin mudadeedu ay tahay labo (2) asbuuc.
12. Marka mudada baafintu dhamaato waa in kiiska laga sameeyaa gungaar.
13. Gungaarka kiiska waxaa loo gudbinayaa Xeer-laalinta Qaranka.
14. Ka dib waxaa loo dalbayaa warqada maxkamda oo ay ku cadahay xogta la badalayo.
15. Intaas kadib, dokumentigii qofka, gungaarka dacwada iyo maxkamadda waxaa dib loogu soo celinayaa HSJ si looga saxiixo Agaasimaha Guud HSJ isaga oo maxkamadda ku raaci doona go'aankeeda.

**FG**: HSJ waxay magac badalka u sixi kartaa qofkii uu hore uga qaldamay magaciisa, balse lama ogolaanayo qof doonaya inuu ka guuro magaciisa rasmiga ah, qofkii isku daya in uu la baxo magac been abuur ah isla markaana ay hay'adu ku ogaato waa fal dambiyeed la horgeyn doono sharciga.

Wax-kabadalka, Baasaboorka Ciladoobay, Lumay ama leh xogo kala Duwan waxaa lagu faah-faahiyey Hab-raaca Sumaddiisu tahay **HSJ/XAG/0156/23** Tr: **02/10/2023.**

**D) Waajibaadka Laga Doonayo Sargaalka Xogta Baasaboorka u Badalaya Muwaadinka Codsaday;**

Sargaalka u shaqeynaya muwaadinka doonaya inuu wax ka badalo xogta ku qoran baasaboorkiisa, waxaa laga doonayaa in uu qaado tilaabooyinkaan soo socda;

1. Waa in uu kala wareego muwaadinka baasaboorka wax laga badalayo;
2. Waa in uu marsiiyaa Hab-raaca Basaboor Bixinta Qodobkiisa 4aad, Farqadiisa A, B iyo C ee wax ka badalka xogta baasaboorka;
3. Waa in uu helo ogolaanshiyaha saxiixa Agaasimaha Guud ama cidda uu wakiisho.
4. Waa in ay cilad bixiyaan baasaboorka Burinta/Waxkabedalka ee uu Agaasimaha Guud ama cidda uu wakiisho ogalaatay xafiiska cillad bixinta ee Xarunta Dhexe ee HSJ;
5. Marka la soo ogolaado isla markaana habku aqbalo badalaaddaas, waxaa sargaalka laga doonayaa in uu dulleeliyo ama geesaha ka jaro baasaboorka la badalay;
6. Waa in uu ku wareejiyaa baasaboorka la badalay qeybta aarkiifiyada ee xafiiska;
7. Baasaboor wax laga badalay xogtiisa, dib looguma celin karo muwaadinka iska badalay, waa in laga xareeyaa isaga oo la duleeliyey ama geesaha laga jaray arkiifiyadda xaafiiska loona diyaariyaa in la baabi'iyo (La gubo) marka ogolaansho looga helo xarunta dhexe ee HSJ;
8. Sargaalkii wax ka badala baasaboor, isaga oo aan tilaabooyinkaan u qaadin si dhameys tiran, wuxuu wajihi doonaa xeerarka ciqaabta ee dalka u dagsan.

**FG**: Sidaas darteed, tilaabo kasta oo la qaado lana xariirta baasaboor dhacay ama xogtiisa wax laga badalay isla markaana aan loo marin hab-raacaan waxay noqoneysaa mid dhinac marsan xeerarka iyo sharciga bixinta baasaboorka, waxayna noqon kartaa danbi laga galay qaranka.

## QODOBKA 5aad:
## Baasaboorada Diblomaasiga iyo Shaqada

Baasaboorada Diblomaasiga iyo shaqada waxaa lagu bixin karaa warqadda Wasaaradda Arimaha Dibadda iyo saxiixa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyada. Qofka qaadanaya baasaboorka Diblomaasiga ama shaqada waxaa laga doonayaa in uu soo buuxiyo shuruudaha hoos ku xusan:

1. Warqadda Wasaaradda Arimaha Dibadda (Wasiirka, Wasiir xigeenka, iyo Xoghayaha joogtada ah);
2. Ogolaanshaha Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiydaha (Saxiixiisa);
3. Koobiga kaarka aqoonsiga;
4. Warqadda shaqaaleysiinta ama magacaabista (Xaafiiska Magacaabey ama shaqaaleysiiyey);
5. Caddeynta sababta qaadashada baasaboorka.

**FG:**

1. Baasaboorka Diblomasiga ee xaaska loo soo dalbo waxaa laga doonaya Shahaadada Nikaaxa.
2. Shaqaalaha kumeel-gaar ah ee dowladda waxaa laga doonayaa Bank Statement.
3. Baasaboorka Shaqada lama siin karo shaqaale da'diisu ka yar tahay 18 sano.

## QODOBKA 6aad:
## Qaab-qoridda Baasaboorka Soomaaliga ah

Baabasaboorka Soomaaliga ah waa baasaboor casri ah ama elektaroonig ah (E-passport), leh qaab-qorid u gaar ah isla markaana waafaqsan hababka caalamiga ah ee loo qoro ama loo qaabeeyo baasaboorada. Baasaboorka Soomaaliga ah wuxuu leeyahay qaab-qorid u gaar ah marka la qorayo xogta shaqsiga, tusaale:

1. **Magaca shaqsiga**: Waxaa geli kara sadex magac ugu badnaan/oo kaliya (lama qorayo: Naaneysta, Darajooyinka, Xilalka, iwm);
2. **Magaca hooyada**: Waxaa geli kara sadex magac ugu badnaan/oo kaliya.
3. **Taariikhda**: oo ka kooban Maalinta, Bisha, iyo Sanadka (Maalinta/Bisha/ Sanadka);
4. **Goobta dhalashada**: Waxaa geli kara hal magac deegaan kaas oo leh shuruudaha sharciga (Dastuurka) dalku u degsan;
5. **Shaqada**: Waxaa geli kara hal magac shaqo oo kali ah oo Wassaaradda Shaqada ka diiwangashan ama u aqoonsatahay shaqo;
6. **Nooca Jinsiga**: Waxaa geli kara hal nooc oo jinsi ah (Lab ama dhedig);
7. **Saxiixa shaqsiga**: Waxaa geli kara saxiixa shaqsiga qaadanaya baasaboorka. Saxiixa shaqsiga waa lagama maarmaan hadii uu qaangaar yahay.

Qof kasta oo ah muwaadin Soomaali ah ama Sharcigu u ogolaaday (Siismo) wuxuu xaq u leeyahay qaadashada baasaboorka Soomaaliga, haddii uu ka gudbo shuruudaha uu dhigayo sharciga bixinta baasaboorka Soomaaliga isla markaana ku qanco qaab-qoridda xogta ee baasaboorka.

Hadaba, si loo ilaaliyo sumcadda iyo tayada baasaboorka waxaa la farayaa xaafiisyada uu khuseyo habraacaan in ay ilaaliyaan qaab-qoridda baasaboorka Soomaaliga, isla markaana ay ka fogaadaan diiwaangelinta xogta aan waafaqsaneyn qaab-qoridda halkaan ku cad.

## QODOBKA 7AAD:
## Hubinta Sharciyadda Ajaanibta Sheeganaya Jinsiyadda Soomaaliga ah

Dadka ajnabiga ah ee sheeganaya in jinsiyadda Soomaaliya hore loo siiyey iyaga ama waalidkood waxaa la marinayaa Hab-raaca Sumaddiisu tahay **HSJ/0187/17** Tr: **26/02/2017**.
Wuxuu halkaan ku soo gudbinaya Hab-raaca hubinta Ajaanibta sheeganaya Jinsiyadda Soomaaliga ah, waana sida soo socota:

Ajaanibta sheeganaya Jinsiyadda Soomaaliya waxay kala noqon karaan sida soo socota:

1. Qof anjabi ahaa laakin sheeganaya in horay loo siiyey jinsiyadda Soomaaliga wixii ka horeeyey 31 December 1990.
2. Qof sheeganaya in uu dhalay aabbe jinsiyadda Soomaaliga ah horay loo siiyey.
3. Qof soo galay Soomaaliya wixii ka dambeeyey Dec. 31 1990 ama ilmaha uu dhalay qofkaasi oo sheeganaya jinsiyadda Soomaaliga ah.

**Qofka 1aad: Waxaa laga hubinayaa;**

1. Teesaraha aqoonsiga Dowlada hoose, teesare shaqo ee xilligaas la siiyey oo cadaynaya Hay'addii uu u soo shaqeeyey ama baasaboor lagu safray ka hor Janaury 1991 oo ay ku taalo bixid iyo galid xilligaas ah.
2. In uu ku hadli karo luqadda Soomaaliga isla markaana yaqaano dhaqanka Soomaaliga.
3. Hubin in uu dib ka qaatay jinsiyad kale maadaama sharcigii Jinsiyada ee dalka ka jiray uusan ogolayn labo jinsiyadood.
4. Dekreetadii madaxwayne ee lagu siiyey Jinsiyadda oo ay wehliyaan dokuminti dhamaystiran oo koobaya ogolaanshihiisa biloow ilaa dhamaad.
5. Xaqiijin in jinsiyadiisu tahay Siismo ama Soomaaliyeeyn iyo in ay tahay jinsiyad sharafeed aan lahayn xaquuqaha muwaadinimo.
6. In uusan ku dhicin xukun makamadeed oo uu ku wayn karo jinsiyadda markii la siiyey kadib.

**Qofka 2aad: Waxaa laga hubinayaa shuruudaha hoos ku xusan;**

1. Waa inuu keeno Cadayn muujinaysa xiriirka ka dhaxeeya ee waalidnimo aabahaas horay loo siiyey jinsiyadda.
2. Waa Inuu keeno documenti dhamaystiran ee Jinsiyada aabihiis .
3. Waa Inuu ku hadli karo luuqada isla markaana yaqaano dhaqanka Soomaaliga.

**Qofka 3aad:**
Ajnabiga yimid ama ku dhashay Soomaaliya wixii ka dambeeyey Dec. 31 1990 uma yeelanayo wax xaquuq ah inuu helo jinsiyada Soomaaliga lama siinayo.

**Baarista iyo Go'aan ka Gaarista**

Baarista kiisaska la xariira ajaanibta sheeganaya jinsiyadda Soomaaliga ah waxaa awood u leh Waaxda Baarista ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, waxaana laga doonayaa xaafisyada laga bixiyo baasaboorka Soomaaliga ah (Dalka iyo Dibadda) in ay soo gudbiyaan Dukumentiyada iyo sheegashada Ajaanibta inta aysan u soo dalbin baasaboor ama dukumenti kale. Go'aanka baarista kadib waxaa lala wadaagi doonaa xaafisyada ay khuseyso.

Sidoo kale, kiisaska u baahan go'aan ka gaarista Agaasimaha Guud waxay usoo gudbiyaan Xafiiska Agaasimaha Guud.

Hadabba, xaafisyada laga bixiyo baasaboorka Soomaaliga waxaa ka reeban in ay u soo dalbaan baasaboor qof aan Soomaali dhalad ah aheyn (Isir, Af, iyo Dhaqan).

Fulin Wacan

**Mdne. Axmed Siciid Maxamed**
**Agaasimaha Guud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
Immigration and Naturalization Directorate
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA